# Gurashada iyo Iibinta Boqoshaaga Duurka ee Minneosta

## RAADINTA, IIBINTA IYO IIBSIGA

## Boqoshaaga duurka

Boqoshaaga duurku waa noocyo kaladuwan oo boqoshaaga la cuno ah, kaasoo lagasoo qaato ama laga raadsho bii'ada dabiiciga ah. Boqoshaaga la beerto ee ku baxa dhul la leeyahay ayaa lamid noqon kara boqoshaaga duurka.

Khatarta ugu wayn ee raadinta iyo adeegsiga boqoshaaga duurka ayaa ka imaanaaya aqoonsiga khaldan ee nooca ama faraca boqoshaaga. Way adag tahay in la kala saaro boqoshaaga duurka ee sunta ah iyo kuwa ay haboon tahay in la cuni karo. Sunta boqoshaaga ayaa sababi kara xanuun fudud ilaa mid daran, ama dhimasho.

Boqoshaa kasta oo la cuni karo waa la ogol yahay in lagu iibsho ganacsi ahaan Minnesota, ilaa iyo inta qofka soo jaray uu maray koorsada aqoonsiga la ogol yahay ee noocaas gaarka ah ee boqoshaaga.

## Tababarka dadka soo jara boqoshaaga

Dadka soo gurta boqoshaaga duurku waa inay qaataan koorsada aqoonsiga boqoshaaga oo uu bixinaayo kuleej ama jaamacad, ama urur noolaha yaqaana.

Koorsadu waxay dabooli kartaa tiradii la doono oo noocyada boqoshaaga duurka ah. Qofka sharciyada u haysta soo gurashada boqoshaaga duurku wuxuu xirfad u leeyahay aqoonsiga keliya noocyada boqoshaaga ku jira koorsada.

Shahaadooyinka waa in lagu qoraa noocyada boqoshaaga koorsada ku jira iyo taariikhda koorsada, iyo

sidoo kale ururka shahaadada baxshay iyo saxiixyada macalimiinta.

## Diiwaanka tababarka

Raadiyaasha doonaaya inay ganacsi ahaan u iibshaan boqoshaagooda waa inay keenaan koobiga shahaadada tababarkooda una keenaan Waaxda Beeraha ee Minnesota (MDA).

MDA ayaa leh kaydka xogta dadka sharciyada u haysta soo gurista boqoshaaga duurka oo oonleen ah kaasoo lagu xareeyo shahaadooyinka tababarka

## Shuruudaha shatiyeynta

Shatiga qofka cuntada ka shaqeeya lagama doonaayo si uu qofku u iibsho boqoshaaga duurka haddii boqoshaaga lagasoo guray dhul uu leeyahay qofka soo guraaya ama uu ka kiraysta gudaha Minnesota ama goballada kale. Shatiga cunto bixiyaha ayaa laga doonayaa qofka si uu u gado boqoshaaga lagasoo qaatay dhulka uusan lahayn ama kiraysan qofka soo guray boqoshaaga.

Qaybaha Xeerka Badqabka Cuntada (21 CFR 112) ayaa qaban kara soo gurashada boqoshaaga duurka. Sharciyada kale sida Farsamooyinka Badeeco Samaynta ee hadda iyo Xeerka Xakamaynada Ka hortaga ah ee Cuntada Dadka ayaa sidoo kale qaban kara, haddii boqoshaaga la warshadeeyo kadib marka lasoo jaro. Wixii xog dheeraad ah, fadlan la xariir MDA (Barnaamijka

**Hennepin County Environmental Health**
479 Prairie Center Drive Eden Prairie, MN 55344
612-543-5200 | www.hennepin.us/envhealth

Content courtesy of the Minnesota Department of Health

Badqabka Cuntada (Produce Safety Program) (producesafety.mda@state.mn.us)).

## Kaydinta iyo warshadaynta

Dadka soo jara boqoshaaga duurka ee boqoshaaga loogu talagalay in la beeciyo waa inay ku kaydiyaan meel loo ogolaaday, aysana dhigin gurigooda. Ka shaqaynta boqoshaaga duurka, ayna ku jiraan laakiin aan ku koobnayn qalajinta, jarjarida, iyo karinta, waa in sidoo kale lagu sameeyaa meel la ogol yahay. La xariir MDA si xog dheeraad ah lagaaga siiyo goobaha la ansixiyay.

## Diiwaan haynta iibsadayaasha

Sifaynta qoraalka ah ee iibsadaha ayaa laga doonayaa dhammaan boqoshaaga laga iibsado dadka sharciyada u haysta soo gurista boqoshaaga duurka. Diiwaankaan waa in lagu hayaa xarunta tafaariiqda muddo 90 maalmood ah ayna ku jiraan waxyaabaha soo socda:

- Aqoonsiga noocyada boqoshaaga saynis ahaan iyo magacooda guud.
- Taariikhda iibka.
- Xajmiga miisaan ahaan, cusub ama la qalajiyay, cadad kasta oo la iibsho.
- Bayaan sheegaaya in boqoshaa kasta lagu aqoonsaday markuu cusbaa.
- Magaca, ciwaanka, iyo lambarka taleefanka ee qofka soo jaray boqoshaaga.
- Xaqiijinta in iibiyuhu ku qoran yahay diiwaanka dadka soo jara boqoshaaga duurka ee Waaxda Beeraha ee Minnesota.

## Diiwaan haynta iibiyaasha

Diiwaanka qoran ee iibka waa inuu hayaa qofka soo jaray boqoshaaga duurka ee ruqsada haysta ama iibiyuhu hayaa 90 maalmood ayna ku jiraan:

- Aqoonsiga boqoshaaga saynis ahaan iyo magacooda guud.
- Wadanka, gobalka, iyo goobta degmada ee lagasoo jaray.
- Taariikhda lasoo jaray.
- Magacyada xarumaha cuntada iibsha ee tafaariiqda ah ee meesha lagu iibsho boqoshaaga duurka.
- Taariikhaha iibka.
- Xajmiyada miisaan ahaan, cusub ama la qalajiyay, cadad kasta oo la iibsho.

## Talo Bixinta macmiilka

Xarumaha baxsha boqoshaaga duurku waa inay u sheegaan macaamiisha khatarta cunista boqoshaaga duurka ayagoo adeegsanaaya waaraqaha macluumaadka, dhalada bandhiga ama talooyinka dookhyada, dusha miisaska, kaararka yaryar, ama waxyaabaha kale ee qoraalka ah. Shaacinta xogta waa in lagu daraa "Boqoshaaga duurka maaha cunto la kormeero waxaana lagasoo guraa meelo aan la kormeerin."

## Shardi dhaafyada iibiyaha shatiyeysan

Sifooyinka qoran ee iibsadaha iyo talooyinka macmiilka lagama doonaayo boqoshaaga lagasoo iibsado beerte shati leh, la kormeero ama warshad.

**Hennepin County Environmental Health**
479 Prairie Center Drive Eden Prairie, MN 55344
612-543-5200 | www.hennepin.us/envhealth
Mushrooms_Somali_HC_6-25
Content courtesy of the Minnesota Department of Health